

Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Askarigii
Yaraa ee
Gidcoon



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen


Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.






Ka dib markii
Yashuuca dhintay,
dadkii reer Binu
Israa'iil oo idil way
ka jeesteen Ilaah
oo adeeci waayeen.
Deedna Ilaah u
daayay inay reerihii
derskooda ahaa
reer Midyaan

ay ka gubaan
dalagii iyo guryahahoodaba.
Israa'iliyiintii waxay
bilaabeen inay godadaka
buuraha ku noolaadaan.




Mid ka mid ah Israa'iliyiinta,
Gidcoon, bay ahayd inuu meel
qarsoon ku tumo sareen.
Wuxuuna ku meeshii
macsarada geed weyn
hoostii. Reer Midyaan
ma aysan garanaynin
meeshaa - laakiin
Ilaah baa sidaa


sameeyey! Ilaah wuxuu
u soo diray Malaa'ig
farriin sidda
kuna socota
Gidcoon.




Ilaah wuxuu Gidcoon ka doonayay inuu burburiyo
sawir bixinta Ilaahyada beenta ah reer Aabbihiis oo
uu dhiso meel Ilaha runta ah lagu caabudo.
Inkastoo Gidcoon ka cabsaday inay dilaan tolkii.
Wuxuuna sameeyey wixii Ilaah ku amray oo idil.



Ilaah waxa kale oo ka doonayay Gidcoon inuu
hoggaamiyo ciidanka Isra'iil eek a soo horjeeda reer
Midyaan. Laakiin Gidcoon wuu cabsaday. Wuxuuna
weydiistay calaamad gaar in Ilaah uu tuso isaga.
Dabadeed wuxuu dul dhigay haraggii meel egagan
oo dusheeda.








"Haddii
dhedadu
ku dhacdo
dhogorta
keliya, oo uu
engagnaado dulka
intiisa kale," Gidcoon baa ku
baryay, "dabadeed waan garan doonaa
inaad ku badbaadin doonto gacantayda,
sidaa horey iigu tidhi." Subaxdii, dhulkii wuu
engagnaa, laakiin **DHOGORTII WAY QOYNEYD!**




Wali wuu shakisan yahay Gidcoon.
Iminka wuxuu doonayaa inuu
Ilaah u soo diro dhedo dhulka
laakiin aysan u ahaan dhogorta.
Subaxdii dambe eek u xigtay,
dhulkiiba qoyay, laakiin
DHOGORTII AY QALALNAYD!



Gidcoon wuxuu bilaabay dibadda inuu u soo saaro
ciidankiisii oo tiro ahaan gardhayay 32,000 oo
askari. Ilaahay wuxuu ka soo reebay 300 oo keliya
raggii. Ilaah ma uusan doonayn inay Israa'iliyiintu
yidhaahdaan "b Gacantayda ayaa i badbaadisay".
Ilaah keliya ayaa ah badbaadiyaha reer Binu
Israa'iil.




Waxaa la oga weli inuu Gidcoon baqayo, Ilaah baa si hoose u maqlay nin reer Midyaan ah oo askari kale u sheegaya riyo cajiib ah. Riyadaa oo ahayd, in kibis shaciir ah oo intay ku soo dul dhacday teendhadii reer Midyaan deedna dumisay.




Waardiyihii kale aad buu u cabsaday.
"Tani waa Seeftii Gidcoon ..." buun ku
qayliyey. Markii uu isna Gidcon maqlay
riaydii micney u yeelatay, wuxuuna gartay
Ilaah inuu guusha siin doono isaga.



Gidcoonna wuxuu diyaarshay isla habeenkaa in la
weeraro. Mid walba oo askatiisa ka mid ah wuxuu
siiyey buun, iyo jalxad
madhan oo ay qoryo
ololaya ku dhex jiraan.
Waxayna hareereeyeen
ciidankii reer Midyaan.




Baaqii Gidcoon markii uu baxayna, ciidamadii waxy
afuufeen buunankii, weyna jajabiyeen jalxadihii
qorig ololayay ku dhex jireen. Dhwaq nooce ah!
Jahawareer nooc ee ah! Wey cabsadeen
Midyaaniintii oo way kala carareen.



Guushan weyn ka dib, raggii reer Binu ISraa'iil
Gidcoon waxay weyddiisteen inuu xukumo iyaga.
"Idinma xukumayo anigu... Rabbiga ayaa idiin
talinaya," Gidcoon baa sidaa ugu jawabay
raggii.

Wuxuu
garanaya in
Ilaahkaliya
u taliyo
dadka
noloshooda.



Askarigii Yaraa ee Gidcoon

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Xaakinada 6-8

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

